



Sirta dooroshooyinka oo xiriirka la leh markii aad cod-bixinayso

Dooroshooyinka dalka Iswiidan waa kuwa madaxbannaan, qarsoodi ah oo toos ah. Qarsoodi waxay u tahay waayo uma baahnid inaad qof ugu sheekeeyso qofka ama xisbiga aad codkaaga siisay. Qof kale go `aan kama gaari karo qofka/xisbiga aad codkaaga siin doonto.




Keligaa markii warqadda codbixinta aad qaadanayso

Warqadaha codbixinta waxay yaalaan dhinaca dambe ee meel go`doonsan, taasoo ku suurtagelin doonto inaad warqadda codbixinta qaadato iyadoo oo aan cid kale daawany. **Waa inaad keligaa tahay markii warqadda codbixinta aad qaadanayso.**



Keligaa dhinaca dambe ee meesha codbixin-ta go`doonsan

Kaddib markii warqadda codbixinta aad qaadato waa in codkaaga diyaarsato. **Markaas waa inaad keligaa tahay markii aad ku sugaran tahay dhinaca dambe ee meesha codbixinta ee go`doonsan.**



Suurtagal ma noqon doonto ogaanshada qofka/xisbiga aad codkaaga siisay

Kaddib markii doorashadaada aad diyaarsatay, waxaa gacanta ugu dhigi doono qaabilayaasha codbixinta, iyaguna hab sugar ayay u kaydin doonaan. Markii warqadaha codbixinta la tirin doono suurtagal ma noqon doonto in la ogaado qofka/xisbiga aad codkaaga siisay.

Qof ka caawino diyaarinta warqadda codbixinta ayaa ku wehlin karo markii aad ku sugaran tahay dhinaca dambe ee meesha codbixinta ee go`doonsan haddii aad la dhiban tahay itaaldarro iwm oo keliya.